



## Taariikh muhiim ah oo loogu talagalay tallaalada ayaa soo socda

Jadeecadii dhawaan dillaacday ayaa ah mid xusuusin u ah tallaalada, iyada oo jirto wakhtiga loo qabtay oo muhiim ah oo soo socda.

Ardayda ku jirta Dugsiyada Dadweynaha Portland ee aan helin dhammaan tallaaladii looga baahnaa waxaa wajahaya wakhtiga loo qabtay oo ah Arbacada, Febraayo 20. Taasi waa taariikhda iska-saariska “exclusion date” ee uu dejiyay gobolku 2019-ka, marka arday kasta oo aan si buuxda loo tallaalin laga yaabo in laga mamnuuco dhigashada fasallada ama daryeelka carruurta ee degmadu bixiso.

Qoysaska ardayda ee diiwaannadoodu muujiyaan tallaalo maqan waxay ahayd in ay toddobaadkii la soo dhaafay warqad ka helaan Adeega Waxbarashada Degmada ee Multnomah.

Tallaalada la iskaga baahan yahay waxaa iyaga oo lacag la’aan ah laga bixin karaa Xarunta Caafimaadka Ardayga ee Degaanka Multnomah, oo toddoba ka mid ah ay ku yaalaan dhismaha PPS. Arday kasta oo ku nool Degaanka Multnomah wuxuu isticmaali karaa adeegyada laga helayo mid kasta oo ka mid ah 10-ka Xarumaha Caafimaadka Ardayga (saddex waa dugsiyada aan ahayn PPS). Fiiri [website-ka barnaamijka](#) adiga oo ka fiirinaya goobaha ay ku yaalaan, saacadaha iyo lambarrada telefoonka. Waxaa lagugula talinayaa in aad hore u soo wacdid si aad ballan u sameysato isla markaana xaqiijiyo in xarunta hayso tallaalada uu ilmahaagu u baahan yahay.

(Fiiri [liiska buuxa ee tallaalada](#) ee gobolku u baahan yahay)

Qoysaska PPS ee u baahan caawimaada dhanka turjumaada warqadda iyo shuruudaha la iskaga baahan yahay waxay isticmaali karaan Khadka Luqadda ee PPS oo lacag la’aan ah iyada oo isticmaalaya lambarrada soo socda:

- Chinese: 503-916-3585
- Russian: 503-916-3583
- Soomaali: 503-916-3586
- Isbaanish: 503-916-3582
- Vietnamese: 503-916-3584